

# Helitaanka Tallaal: Waxa la Filan Karo

## Diyaargarow

1. Wax ka baro [tallaalada COVID-19](#) ama cid waydiiso inay kaa caawiso helidda macluumaadka.
2. La xiriir dhakhtarkaaga haddii aad su'aalo ka qabto tallaalka COVID-19.
3. Guddida [deegaankaaga ee naafooyinkal](#) [koboceed](#) ayaa kaa caawin doona inaad ogaato marka ay tahay markaaga inaad tallaalka qaadato.
4. Waxay qaadan wakhti in la sameeyo tallaal ku filan cid kasta iyo in ballan lagu qabto. Waxa dhici karta inaad hadda qaadan tallaalkaaga COVID-19. Iska samir.
5. Markii wakhtigaaga ay gaarto, waxaad dooran kartaa inaad qaadato tallaalka iyo in kale.
6. Buuxi foomka "Waxay tahay Inaad iga Ogaato" kahor inta aadan ballanta tagin.
7. Akhri ama cidi ha kuu akhrido [sheekada bulsheed](#) ee kusaabsan qaadashada tallaalka COVID-19.
8. Waaxda caafimaadka deegaanka, isbitaal, ama farmasi ayaa ku tallaali doona haddii aad doorato inaad qaadato tallaalka.



## Ballan

1. Waxaad ka qaadan kartaa tallaalka COVID-19 rug caafimaad, isbitaal, ama adigoo baabuurkaaga kujira.
2. Tallaalka waxa lagaaga mudi gacantaada.
3. Waxa dhici karta inaad u baahato inaad sugto kadib tallaalka si aad u hubiso inaanad xasaasiyad ka qaadin.
4. Waa wax caadi ah in dadku saamayn xun ka qaadaan tallaalka. Waxa dhici karta inay gacantu ku buqbuqdo, madaxu ku xanuuno, ama aad daal dareento.



## La Soco

1. Waxaad u baahan doontaa inaad qaadato marqaadasho labaad tallaalkada COVID-19 badankooda.
2. Kadib markii aad tallaalka qaadato, waxaad heli doontaa kaar kuu sheegaya markii aad soo doonayso tallaalka labaad.
3. Waxaad wali u baahan doontaa inaad xirato afaab oo aad adeegsato kala fogaanshaha dadka ilaa ay dad badan oo badan ay qaataan tallaalka.



Wixii su'aalo kale oo kusaabsan tallaalka COVID-19 ah, wac xarunta wicitaanka Waaxda Caafimaad ee Ohio 1-833-4-ASK-ODH (1-833-427-5634) ama booqo [coronavirus.ohio.gov](https://coronavirus.ohio.gov)